

# Talooyin baaq ah oo wadahadalada khalafsan ee idin dhexmara adiga iyo kooxda Waxbarashada Gaar-ahaneed ee ilmahaaga u bedeli kara wanaag

*(Tips for turning difficult conversations with your child's IEP team into productive conversations- Somali version)*

Wadahadalada kulanada lala yeesho kooxda Barnaamijka Waxbarashada Gaar-ahaneed (IEP) waa kuwa adkaan kara. Mararka qaarkood, waalidku waxey shaqaalaha dugsiga ka maqlaan hadalo dareen xumo ku abuuri kara ama aysan hubin. Marar kalena waalidiintu waxey ka walwalaan in ay ka hadlaan baahida ilmahooda iyago ka baqaya in aan la dhageysan. Talooyinkan waxa loogu talagalay in ay waalidka ka saacidaan marxaladaha adag ee wada hadalka shirarka kooxda IEP-ga, iyo in si waxqabad leh waalidku ugu doodo ilmahooda.

## **Kulanka intuusan bilaaban:**

Markaad kulanka ka qeyb qaadaneyso, hadii aad dareento welwal, waxaad weydiin karta qof aad ku kalsoontahay in uu ku raaco sida:

- Qof qoyska ka mid ah, oo kalsooni ku siiyo markaad ilmahaaga doodeyso.
- Saxiib kula dhegeysta, qoraal ku qora kaana caawiya dooda
- Qof jaaliyadda ka socda oo aqoon u leh ilmahaaga, oo ka hadli kara waxa ay ku fiican yihiin, oo ka saacidi kara kooxda waxbarashada qaas-ahaneed in ay fahmaan habka ugu wanaagsan ee loola shaqeeyo ilmahaaga.

## **Helitaanka macluumaadka aad u baahantahay**

Hadii aad dareento in aad ku jahawareertay oo aad lunsantahay kulanka waxbarashada qaas-ahaneed, waxaad oran karta:

- Waan lunsanahay, fadlan ii gaabiya oo mar kale sharax waxa aan ka hadleyno
- Waan wareersanahay. Macluumaadka si kale ma iigu sharixi karta si aan u fahmo

Hadii aadan hubin wax ku saabsan macluumaadka qorshaha waxbarashada qaas-ahaneed ee ilmahaaga, waxaad weydiin karta:

- Adeegyadan sidee u egyihiin dugsi-maalmeedka ilmaheyga
- Sidee bey u waafajintan shaqeysa
- Ma isiin kartaa tusaalooyin gaar ah oo ku saabsan sida aad wax u bareyso ilmaheyga si ay yoolki laga doonayey u garaan

## **Wadaagista welwalkaaga**

Haddii shaqaalaha dugsigu soo jeediyaan isbeddel lagu sameeyo adeegyada IEP ee ilmahaaga oo aadan hubin, waxaad weydiin karta:

- “Ma wadaagi kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida tani u dabooli doonto baahiyaha ilmahayga?”
- “Ma hubo in isbeddelkani uu dabooli doono baahiyaha ilmahayga. Ma isku dayi karnaa tan si tijaabo ah si aan u aragno sida uu ilmahaygu uga jawaabo ka hor inta aanu isbeddel ku samayn IEP?”
- “Maxaan sameyn karna haddii tani ay shaqeyn weydo?”

Haddi waxa ay kooxdu kaaga warbixiso ee ku saabsan horumarka ilmahaagu samaynayo aanay kula habboonayn adiga aragtida horumarka uu ilmahaagu samaynayo, waxaad odhan kartaa:

- “Waxaan ka walwalsanahay in aynaan si cad u arkin baahiyaha ilmahayga. Maxaan ka qaban karnaa arrintaas?”
- “Kuma qancin macluumaadka aad i siinayso ee ku saabsan horumarka ilmahayga. Maxaa kale oo akhbaara ah eegi karnaa si aan si fiican u fahanno horumarka uu ilmahaygu samaynayo?”
- “Waxaan ka walaacsanahay inaan u aragno horumarka ilmahayga si kala duwan. Ilmahaygu waxa uu qabtaa shaqo sare (ama ka hooseeya waxa ku qoran IEP (ama warbixinta horumarka ama qiimaynta). Ma ii macnayn kartaa maxay xogtani ku salaysan tahay? Sidee ku soo ururisay macluumaadkan ku saabsan ilmahayga?”

Haddii aad la wadaagto walaac ku saabsan sharciyada dugsiga ama qeynuunka dugsigu in ilmahaagu ku dhibtoonayo inuu raaco, ee maamulaha dugsigu ku yiraahdo, “Taasi waa kheynuunka mana bedeli karno,” ama “dugsigan sidaa ba looga dhaqma,” waxaad odhan kartaa:

- “Naafanimada ilmahaygu darteed, wey ku adagtahay inay racaan waxyaalahan laga filayo. Maxaa taageero ah oo aan ku dari karna IEP-gooda si aan uga caawino inay bartaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u raacaan sharciyada?”
- “Waan fahamsanahay inay tahay kheynuunka, laakiin ilmahaygu wuxuu qabaa naafo, taas oo ku adkeynaysa inay raacaan kheynuunka dugsiga. Sideen u isticmaali karnaa IEP-ga ubadkayga si aan ugu waafajino in laga dhaafo kheynuun raaca?”
- “Ma wadaagi kartaa koobi kheynuunka isagoo qoraal ah si aan u eegno koox ahaan? Markaa waan awoodnaa inaan si fiican u fahamno qaybta gaarka ah ee ilmahaygu ku dhibaatonayo, oo si wadajir ah u go’aansada maxaa laga yelayaa.”

## **Wax ka qabadka arrimaha**

Hadii ay jirto dhibaato aad ka wawalsantahay in aad ula tagto kooxda IEP-ga ilmahaaga, waxaad oran karta:

- “Waxaan ogaaday in ilmahaygu ku dhibaatonayo \_\_\_\_\_. Ma ii sheegi kartaa waxa aad ku aragto dugsiga?”
- “Waan ogahay in ilmahaygu uu ku dhibtoonayo sababtoo ah waxaan ogaaday \_\_\_\_\_ (tusaale bixi). Sideen u isticmaali karnaa IEP si looga caawiyo tan?”
- “Waxaan ogaaday in \_\_\_\_\_ uu si fiican u shaqeeyo si uu u taageero ilmahayga guriga. Sideed u isticmaali kartaa tan xeeladda dugsiga?”

Haddii xubin kooxeedku yiraahdo: “Ubadkaagu wuu diidaa ama ma \_\_\_\_\_,” waxaad waydiin kartaa:

- “Haddii ilmahaygu samayn karo, way samayn lahaayeen. Sideen ku ogaan karnaa sababta aysan u awoodin?”
- “Waan ogahay in aanay ilmahayga farxad dareemin marka ay ku guulaysan waayaan waxa aad waydiinayso inay sameeyaan, waana ogahay in ilmahaygu doonayo inuu guulaysto. Haddii aan fahmi karno sababta ilmahayga u diiday, markaas waxaan go’aansan karnaa waxa aan u baahanahay inaan sameyno si aan u caawinno. Waa maxay fikradahaaga ku saabsan sababta ay u diidan yihiin?”
- “Ubadkaygu ma leeyahay xirfado uu ku sameeyo waxa aad ka filayso inay sameeyaan? Haddii aysan samayn, markaa aan ka hadalno sidii aad u bari lahayd xirfadahaas.”

Haddii xubin ka mid ah shaqaaluhu uu muujiyo sida uu uga xun yahay halganka ilmahaagu ku hayo dugsiga, waxaad oran karta:

- “Waan ogahay in ubadkaygu uu isku dayayo intii karaankooda ah, waanan ka mahadcelinayaa dulqaadkaaga waxbarashadooda. Maxaad u malaynaysaa inaan samayno si ka duwan si aan u caawino ilmahayga?”
- “Waxa la iga so waca dugsiga inta lagu jiro maalinta dugsiga, laakiin ma jirto wax aan ka qaban karo si aan u hagaajiyo waxa ka dhacaya dugsiga. Waan ka warqabaa xaaladdan, waxaan kala hadlayaa ilmahayga arrintaas, laakiin adinka ayaan idinku tiirsanahay in aad ilmahayga ku caawiso dugsiga. Maxaa fikrado ah oo aad haysaa?”
- “Waan idinla wadaagayaa welwelkiina ku saabsan sida cunugeygu u dhibatoonayo. Taasi waxay ii mujineysa in wax IEP-ga ka mid ah uma shaqeeyo ilmaheyga. Sideen u bedeli karnaa IEP-ga si aan u siino ilmahayga taageero ka sii wanaagsan?”

## **Xalinta Dhibaatada**

Haddii xubin shaqaalaha ka mid ah yiraahdo: “Ma garanayno jawaabta,” waxaad waydiin kartaa:

- “Yaan wici karnaa (ama ku martiqaadi karnaa kulanka) si ay nooga caawiyaan inaan helno jawaabta?”
- “Miyaan dooran karnaa maalin kale aan kulanno ka dib marka kooxdu ay hesho wakhti ay ku ogaadaan jawaabta?”

Haddii xubin ka mid ah shaqaalaha dugsigu yidhaahdo: “Ma haysanno lacag ama shaqaale aan taas ku samayno,” waxaad odhan kartaa:

- “Haddii talada aan so jeediyey shaqayn waydo, maxaad soo jeedinaysaa beddelkeeda si aan u daboolno baahiyaha ilmahayga?”
- “Waan fahamsanahay in dugsigu leeyahay dhibaatooyin miisaaniyad dhaqaale (ama shaqaale) hadda. Laakiin ilmahaygu waxu leeyahay IEP oo aan sugi karin in dhibaatooyinkaas la xaliyo. Aynu ka wada shaqayno sidii aynu u heli lahayn hal-abuur si aan u qancino baahiyaha ilmahayga hadda.”

## La shaqeynta kooxda

Haddii xubin ka mid ah shaqaalaha kooxda uu sheego wax aad u malaynayso inay ra'yi noqon karaan, waxaad waydiin kartaa:

- “Ma iga caawin kartaa inaan fahmo sababaha aad sidaan u leedahay?”
- “Ma ila wadaagi kartaa xogta aad ururisay ee taageeraya waxa aad sheegayso? Waxaan jeclaan lahaa in kooxda IEP-ga dib u eegto macluumaadkaas. Marka waxaan si wadajir ah u qaadan karnaa go'aanno ku saabsan tallaabooyinka inaan qaadano tahay, si aan u caawiyo ilmahayga.”

Haddii xubin ka mid ah shaqaalaha dugsi ugu muuqato inuu qof walba u hadlayo, waxaad waydiin kartaa:

- “Ma jiraa qof kale oo leh fikrad ama wax kale oo ay la wadagaan?”
- “Waan ka mahadcelinayaa waxaad sheegayso. Waxaan sidoo kale xiiseynayaa waxa qof kasta oo kale uu ka qabo arrintan. Ma ka maqli karnaa kooxda inteeda kale?”

## Qorsheynta talaabooyinka xiga

Haddii aad heshiis ka gaartaan isbeddelka IEP-ga ilmahaaga ama haddii wax lagu ballan qaado shaqaalaha dugsi, waxaad weydiin kartaa:

- “Maxay yihiin tallaabooyinka xiga?”
- “Yaa mas'uul ka noqon doona hubinta in wixii aan ku heshiinnay la fuliyo?”
- “Ma ku heshiin karnaa waqti go'an si tani u dhacdo?”

Haddii aysan jirin waqti ku filan kulanka ee wax kasta ee ka mid aha ajandaha loo helin waqti, ama waqtigu idinka dhamaado ka hor intaan su'aalahaaga ama welwelkaaga laga wada xaajoon, waxaad odhan kartaa:

- “Si xushmad leh, waxaan codsanayaa in aan bilaabo kulankaan anigoo ka hadlaya welwelkayga.”
- “Waan fahamsanahay in shan daqiiqo oo kaliya ay noo harsan tahay kulankeena, laakiin ma aanan hadlin waqti aan kaga hadalno dhammaan welwelkayga. Sidee ugu dhakhsaha badan ayaan u qabsan karnaa waqti kale si aan u dhammeyno shirkan?”
- “Waqtigii waa naga dhammaaday, laakiin weli waxaan qabaa su'aalo. Sideen ku heli karaa inta ka hartay su'aalaheyna jawaabtooda?”

Haddii aad dareento cadaadis inaad saxiixdo waraaqaha kulanka IEP, ama xaalado kale, waxaad odhan kartaa:

- “Waan ogahay in waraaqahani ay muhiim yihiin, waana sababta aan ugu baahanahay wakhti aan kaga fikiro arrintan macluumaadka intaan saxiixin. Waqti intee le'eg ayaan haystaa si aan u soo celiyo waraaqaha?”
- “Waxaan jeclaan lahaa inaan xogtan kala hadlo qoyskayga ka hor intaan saxiixin.”
- “Waan ogahay in aan su'aalo badan ka heli doono hadhow, marka hadda waxba ma saxiixi karo. Yaa iga caawin kara aniga su'aalo kulankaan ka dib?”
- “Diyaar uma ihi inaan saxiixo waraaqahan maanta. Goorma ayaan soo celinayaa yaan u dhibaa?”

## **Khilaafaadka kooxda**

Haddii dhamaadka kulanka ay kooxdu ku tiraahdo “Maya” isbedel aad weydiisaneyso dugsiga inuu sameeyo IEP ilmahaaga, ama haddii kooxdu aanay ku qancin wax ku saabsan isbeddelka IEP-ga ubadkaaga ee dugsigu soo jeedinayo, waxaad odhan kartaa:

- “Waxay u muuqataa inaan isku khilaafsannahay waxa ilmahaygu uga baahan yahay IEP-ga. Maxaan ka qaban karnaa khilaafkan?”
- “Maadaama aad diidayso codsigayga, fadlan iga caawi inaan fahmo waxa xiga. Waa maxay tallaabooyinka aan qaadi karaa hadda?”
- Waxaan dareemayaa in dugsigu uusan i maqlayn oo kuma raacsani waxa aad ii soo jeedinayso Ilmaheyga maclumaadkooda. Maxaan samayn karnaa hadda?
- Waxan aaminsanahay in uu jiro nidaam loo dejiyay khilaafyada. Sideen u isticmaalaa nidaamkaas?

Haddii aad dareento in xidhiidhkaaga kooxda IEP ay waxyeelo ka soo gaartay khilaafkiina IEP-ga ilmaha, waxaad odhan kartaa:

- “Waan ogahay in aanu xoogaa khilaaf ah na dhex maray. Waad ku mahadsan tahay inaad maanta halkan u joogtid inaad itaageerto aniga iyo ilmahayga. Waxaan ku rajo weynahay inaan go’aano wanaagsan u qaadan karno ilmahayga si wadajir ah.”
- “Waxaan horey u yeelanay xoogaa wada hadal adag, laakiin cunugeyga wu nagu tiirsan yahay inaan u shaqeyno koox ahaan. Waxaan codsanayaa in aan maanta is caawino si aan uga tanasulno wixii tagay oo aan diirada saarno oo kaliya waxa ubadkaygu u baahan yahay, si aan hore ugu socono danta ubadkayga”.

*Hadi aad taageero isu-diyarin kulanka Waxbarashada Gaar-ahaneed (IEP meeting) u baahantahay, la xidhiidh u doodaha waalidka ee PACER, adiga oo wacaya (952) 838-9000.*